Tallaallada Aad U Baahan Tahay Inta Aad Uurka Leedahay



Tallaalladu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah daryeelka caafimaadka, oo ay ku jiraan xilliga uurka. Tallaallada xilliga uurka waxay ilaaliyaan adiga iyo ilmahaaga, maadaama labadiinuba aad halis weyn ugu jirtaan haddii aad qaaddaan cudur uu tallaalku ka hortagi karo. Inta aad uurka leedahay, waxaa muhiim ah inaad qaadato tallaallada lagugula taliyay. Tallaalladani waxay ilmahaaga u gudbiyaan unugyada difaaca jirka ee la dagaallama cudurrada ka hor inta uusan dhalan. Tani waxay ilmahaaga ka ilaalisaa cudurrada bilaha ugu horreeya ee noolashooda. Tallaalladu waxay sidoo kale yareeyaan halista aad ugu jirto inaad xanuunsato inta aad uurka leedahay, taas oo khatar noqon karta. Tallaallada soo socda ayaa lagula talinayaa in la qaato inta aad uurka leedahay.

Tdap (Teetanada, gawracatada iyo xiiqdheerta)

Tallaalka Tdap wuxuu ka difaacaa saddex cudur: teetanada, gawracatada iyo xiiqdheerta (qufaca daran). Haweenka uurka leh waxay u baahan yihiin inay qaataan tallaalka Tdap inta lagu jiro uur kasta, inta u dhaxaysa toddobaadka 27-aad iyo 36-aad. Tallaalkani wuxuu ilmahaaga ka ilaalinayaa cudurrada isla marka uu dhasho iyo bilaha ugu horreeya ee noloshiisa. Xiiqdheertu waxay ku dhici kartaa dadka da' kasta leh, laakiin waxay nafta halis gelin kartaa dhallaanka iyo carruurta yaryar. Dhallaanku ma qaadan karaan tallaalka DTaP (tallaalka carruurta ee gawracatada, teetanada iyo xiiqdheerta) ilaa ay ka gaaraan 2 bilood. Dhallaanku si buuxda ugama difaacaan cudurradan ilaa ay ka gaaraan ugu yaraan 6 bilood, markaas oo ay qaateen saddex kuuro oo tallaalka ah. Tani waa sababta ay muhiim u tahay in la qaato tallaalka Tdap inta lagu jiro xilliga uurka. Difaaca jirka ee laga helo tallaallada Tdap iyo DTaP wuu daciifaa waqti ka dib, sidaas darteed dhammaan dadka waaweyn waxay u baahan yihiin kuuro xoojin ah oo talaalka Tdap ah 10-kii sano mar. Waalidiinta ilmaha markaas dhashay waa inay hubiyaan in qof kasta oo ag jooga ilmahooda uu tallaalka Tdap iyo tallaallada kale ee lagula taliyay si waafaqsan jadwalkooda u qaatay.

RSV (Fayraska isku-dhafka neef-mareenka)

Fayraska Isku-dhafanka Neef-mareenka (RSV) waa fayras caadi ah oo inta badan keena calaamado fudud oo u eg hargab. Laakiin dadka waaweyn ee da’da ah, dhallaanka iyo carruurta yaryar, RSV wuxuu noqon karaa mid daran oo xitaa sababi kara dhimasho. Dhab ahaantii, RSV waa mid ka mid ah sababaha ugu waaweyn ee dhallaanka isbitaalka loo dhigo. Nasiib wanaag, haweenka uurka leh waxay ilmahooda ka ilaalin karaan RSV iyagoo qaata tallaal. RSV caadi ahaan wuxuu faafaa laga bilaabo Sebtembar ilaa Janaayo. Haweenka uurka leh waa inay qaataan tallaalka RSV ee Abrysvo bilahaas, marka ay uurkoodu u dhexeeyo 32 ilaa 36 toddobaad. Waxay dhallaanka markas la dhalay siisaa difaac isla markiiba, wuxuuna socdaa qiyaastii 6 bilood. Haddii aadan qaadan Abrysvo intii aad uurka lahayd, ilmahaagu waa inuu qaataa daaweynta unugyada difaaca ee monoclonal-ka ah (nirsevimab ama clesrovimab) inta lagu jiro xilligiisa ugu horreeya ee RSV, ka hor inta uusan gaarin 8 bilood. Haddii aad tallaalka RSV qaadatay intii aad uur hore lahayd, uma baahnid inaad mar kale qaadato tallaalka, laakiin ilmahaagu waa inuu qaataa daaweynta unugyada difaaca ee monoclonal-ka.

Hargabka (Influenza)

Hargabka (flu) wuxuu u daran noqon karaa qof kasta, xitaa dadka caafimaad qaba. Infekshanka hargabku wuxuu u badan yahay inuu haweenka uurka leh u keeno in isbitaal la dhigo ama xanuun nafta halis gelin kara. Hargabku wuxuu keeni karaa foosho soo hormarta waqtigeeda iyo dhalmo soo hormarta waqtigeeda inta aad uurka leedahay. Dhallaanka lama tallaali karo hargabka ilaa ay ka gaaraan 6 bilood, sidaas darteed qaadashada tallaalka hargabka inta aad uurka leedahay waxay kuu oggolaanaysaa inaad ilmahaaga ka ilaaliso hargabka bilaha ugu

horreeya ee noloshiisa, iyada oo loo marayo unugyada difaaca jirka ee hooyada. Xilliga hargabku caadi ahaan wuxuu socdaa Oktoobar ilaa Maajo. Haweenka uurka leh waa inay qaataan tallaalka hargabka ugu dambayn dhammaadka Oktoobar, waxaana la tallaali karaa wakhti kasta inta ay uurka leeyihiin. Haddii aad uur leedahay, waa inaadan qaadan tallaalka hargabka ee sanka lagu buufiyo, balse waa inaad qaadataa tallaalka la isku duro. Tallaalka hargabku aad buu ugu fiican yahay adiga iyo ilmahaaga. Waxay 50% yareyn kartaa halista aad ugu jirto inaad qaaddo hargabka.

COVID-19 (Cudurka korona fayraska 2019)

Haweenka uurka leh iyo ilmahooduba waxay halis weyn ugu jiraan inay si daran ugu xanuunsadaan COVID-19. Tallaallada COVID-19 waxay si weyn u yareeyaan khatartan, waxayna hoos u dhigaan suurtagalnimada in COVID-19 awgiis isbitaal lagu dhigo, dhibaatooyin caafimaad ay dhacaan ama dhimasho ay timaaddo. Haweenka uurka leh ee uu ku dhaco xanuunka COVID-19 ayaa aad ugu dhow inay dhalaan ilmo dhicis ah ama ilmo miisaankiisu yar yahay, marka loo eego kuwa aan xanuunsanayn. Dhallaanku ma qaadan karaan tallaalka COVID-19 ilaa ay ka gaaraan 6 bilood. Marka aad uurka leedahay aad qaadato tallaalka COVID-19, waxaad ilmahaaga ka ilaalin kartaa COVID-19 iyada oo loo marayo unugyada difaaca jirka ee hooyada ilaa uu ka gaarayo da'da uu tallaalka qaadan karo. Tallaallada COVID-19 aad bay ugu fiican yihiin dadka uurka leh.



Tixgelinno Kale oo Ku Saabsan Tallaallada Inta Uurka Lagu Jiro

Haddii aad la kulanto jeermisyo gaar ah ama aad halis weyn ugu jirto infekshan, bixiyahaaga daryeelka caafimaad ayaa sidoo kale kugula talin kara tallaallo kale inta aad uurka leedahay. Waxaa jira tallaallo qaarkood oo ay tahay inaadan qaadan inta aad uurka leedahay. Tallaalladan waxaa ka mid ah tallaalka hargabka ee sanka lagu buufiyo (balse dooro tallaalka la isku duro), MMR (jadeecada, qaamo-qashiirka iyo jadeecada Jarmalka), varicella (busbuska), HPV (fayraska papilloma ee aadanaha), iyo qaar ka mid ah tallaallada xilligga safarka la qaato. Dadka qaarkood waxay u baahan yihiin inay qaataan tallaallo marka ay umulaan ka dib, ka hor inta aysan isbitaalka ka bixin. Tani waxay noqon kartaa xaaladda cudurka awgeed ama sababtoo ah ma aysan qaadan tallaallada lagula taliyay ee ku habboon da'dooda. Waxay qaadataa dhowr toddobaad ka dib marka la qaato tallaalka in jirku soo saaro unugyada difaaca jirka oo uu helo difaaca uu tallaalku bixiyo. Haddii aad naas nuujinayso, difaaca ay unugyada difaaca jirku leeyihiin wuxuu ilmahaaga ugu gudbi doonaa caanaha naaska. Way fiican tahay oo faa'iido ayay leedahay inaad qaadato tallaallo ka dib dhalmada, inta aad naaska nuujinayso.

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan tallaallada xilliga uurka, fadlan kala hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka.